

# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed



**ISKA ILAALI  
WAA WAX  
KU SAABSAN  
XIIQ DHEER**

*Ilaali ilmahaaga*

**Hubi in reerkoo dhan  
tallaalku u dhan yahay**

**Kani waa diiwaanka caafimaadka shakhsiyeed:**

**Fadlan qaado buuggan markaad timaado adeeg caafimaad,  
dakhtar ama isbitaal midkood**

**Diiwaankan caafimaadka waxaa isku soo hagaajiyey iyadoo ay caawinayaan waalidiinta, kalkaalisada caafimaadka qoyska iyo ilmaha, dhakhaatiirta guud, aqoon yahanada caafimaadka ee kale iyo aqoonyahanada ururada macaamiilaha. Waa dib u cusbooneysiinta daabacaadihii hore ee Diiwaanka Caafimaadka Shakhsiyeed ee laga isticmaalayey NSW laga soo bilaabo 1988.**

**NSW Health waxay aqoonsatay oo ay ku faraxsan tahay ogolaanshaha isticmaalka qalab ka mid ah oo ka yimid 'My Health and Development Record', Maternal and Child Health Service, Department of Education and Early Childhood Development, Victoria ee daabacaadan dhexdeeda.**

## **NSW MINISTRY OF HEALTH**

73 Miller Street

NORTH SYDNEY NSW 2060

Tel. (02) 9391 9000

Fax. (02) 9391 9101

TTY. (02) 9391 9900

[www.health.nsw.gov.au](http://www.health.nsw.gov.au)

Shaqadani waa xafidan tahay. Waxaa laga yaabaa in dib loo soo saaro dhammaan ama qayb ujeedadoo ah waxbarasho ama tababar darteed iyadoo ku xiran in lagu daro aqoonsiga cidda iska leh. Taranka ujeedooyinka aan ka ahayn kuwa kor ku xusan waxay u baahan yihiin ogolaansho qoran oo ka timid NSW Ministry of Health.

© NSW Ministry of Health 2017

SHPN (HSP) 170154

ISBN 978-1-76000-628-0 (daabac)

ISBN 978-1-76000-629-7 (interneet)

Abril 2017

## Hambalyo dhalashada ilmahaaga cusub

Diiwaankan Caafimaadka Shakhsiyeed (ee loo yaqaan 'Blue Book' ga) waa buug muhiim u ah adiga iyo ilmahaaga. Wuxuu diiwaangeliyaa ilmahaaga caafimaadkiisa, jirooyinkiisa, dhaawacyadiisa, kobaca iyo koritaanka oo wuxuu ka kooban yahay macluumaad caafimaad oo qiimo leh oo adiga iyo ilmahaagu aad ugu baahan doontaan noloshiina oo dhan.

### Xasuuso inaad buuggan u qaadatid:

- **kalkaalisadaa caafimaadka qoyska iyo ilmaha**
- **ballamaha tallaalka**
- **dhakhtarkaaga, kalkaasida rugta caafimaadka iyo aqoon yahanada kale ee caafimaadka**
- **dhakhtarka takhasuska ee ilmahaaga**
- **isbitaalka, oo ay ku jirto xaaladaha degdega ah**
- **dakhtarkaaga ilkaha**
- **ka diiwaangeli ilmahaaga xannaano maalmeedka, kindhada dugsiga ka hor ama dugsiga.**

Diiwaankan xaggiisa dambe wuxuu leeyahay bashqad loogu talagalay wixii dukumiinti muhiim ah.

Carruurtu dhammaan lama wada noola waalidkood, dad kale ayaa laga yaabaa inay ku leeyihiin door muhiim ah xannaanada ilmaha. Ereyga 'waalid/iinta' ee lagu isticmaalay buuggan waxaa ku jira xannaaneeyayaasha ilmaha.

## Tusmo

<b>Macluumaadka loogu talagalay waalidiinta.....</b>	<b>9</b>
<b>Website iyo xiriiro muhiim ah .....</b>	<b>17</b>
<b>Macluumaadkayga iyo taariikhda qoyska.....</b>	<b>21</b>
Dhammaan wixii igu saabsan .....	21
Qodobada khatarta iyo taariikhda caafimaadka qoyska .....	22
<b>Diiwaanada.....</b>	<b>23</b>
Qoraalada horumarka.....	23
Diiwaanka jirooyinka iyo dhaawacyada .....	35
<b>Shaxda kabcida.....</b>	<b>39</b>
<b>Faahfaahinta dhalashada iyo baaritaanka ilma dhashay.....</b>	<b>53</b>
<b>Jeegareynta 1-4 toddobaad .....</b>	<b>59</b>
<b>Jeegareynta 6-8 toddobaad.....</b>	<b>65</b>
<b>Tallaalka 4 bilood .....</b>	<b>71</b>
<b>Jeegareynta 6 bilood .....</b>	<b>73</b>
Ilmahaaga ilkhooda – ku ilaalinta caafimaad qabka .....	80
<b>Jeegareynta 12 bilood.....</b>	<b>83</b>
<b>Jeegareynta 18 bilood.....</b>	<b>91</b>
<b>Jeegareynta 2 sanno.....</b>	<b>97</b>
<b>Jeegareynta 3 sanno.....</b>	<b>103</b>
<b>Jeegareynta 4 sanno.....</b>	<b>109</b>
<b>Dugsiga sare iyo ka hoose dhexe.....</b>	<b>119</b>
<b>Tallaalka.....</b>	<b>121</b>
<b>Shaxda CPR.....</b>	<b>125</b>

## Jeegareynta caafimaadka soo noqnoqda oo kooban

Waa inaad u geysaa ilmahaaga kalkaalisda caafimaadka qoyska iyo ilmaha Child and Family Health Centre (Xarunta Caafimaadka Qoyska iyo Ilmaha) ee xaafadaada, ama dakhtarkaaga, wixii ah jeegareynta caafimaadka mid kasta oo ka mid ah da'ahan soo socda Waxaad ku diiwaangelin kartaa ballamahan soo socda ee shaxda hoose.

Da'da	Faahfaahinta ballanta		
	Taariikh	Wakhti	Faallooyin kale
1-4 toddobaad			
6-8 toddobaad			
6 bilood			
12 bilood			
18 bilood			
2 sanno			
3 sanno			
4 sanno			

Tixraac website ka NSW Health [www.health.nsw.gov.au/immunisation/schedule](http://www.health.nsw.gov.au/immunisation/schedule) ee markaad u tegayso adeeg bixiyahaaga tallaalka caafimaadka.

## Diiwaangeli ilmahaaga hadda!

Sii ilmahaaga bilowga saxda ah.

- Diiwaangelinta dhalmadu waa khasab waana bilaash.
- Waa inaad diiwaangelisaa dhalashada ilmahaaga **60 maalmood gudahood**.
- Waa inaad diiwaangelisaa ilmahaaga si uu u helo shahaadada dhalashada.

Shahaadada dhalashadu waxay muujineysaa caddeynta sharciga ah ee da'da ilmaha, goobta dhalashada iyo faahfaahinta waalidka waxaana loogu baahan yahay lacagaha dawlada qaarkeed, iska diiwaangelinta dugsiga iyo ciyaaraha, furida xisaabta bangiga iyo inaad baasaboorto dalbato.

## Diiwaangleinta dhalashada

Ka dib markuu ilmuhu dhasho, isbitaalka ama umuliyada ayaa ku siin doonta macluumaadka sidii aad ku diiwaangelin lahayd dhalashada. Markaad diiwaangeliso dhalashada, waxaad sidoo kale dalban kartaa shahaadada dhalashada. Lacagta ujrada ee shahaadada dhalashada ayaa layska qaadayaa.

## NSW Registry of Births Deaths & Marriages (Diiwaangelinta Gurka, Dhimashada & Dhalashada ee NSW)

Boosta: GPO Box 30, Sydney NSW 2001

Taleefanka: 13 77 88

NRS: 1300 555 727 (hadalka ama maqal ka wax ka qaba)

Foomka diiwaangelinta dhalashada ee internetka ah waxaa la filayaa 2017 dhexdiisa. Ka eeg website ka wixii faahfaahin ah: [www.bdm.nsw.gov.au](http://www.bdm.nsw.gov.au)



Justice

Registry of Births  
Deaths & Marriages

## Do you need help reading English?

If you do not read English please speak to someone at the Health Care Interpreter Service at the closest location to you listed below. You can also phone the Translating and Interpreting Service on 131 450.

Please take this book with you when you attend any health service, doctor or hospital.

### Arabic

#### هل تحتاج إلى مساعدة في قراءة اللغة الإنكليزية؟

إذا كنت لا تحسن القراءة بالإنكليزية، تحدّث مع شخص في Health Care Interpreter Service (خدمة الترجمة الشفهية للرعاية الصحية) في أقرب مكان لك من الأماكن المدرجة أدناه. ويمكنك أيضًا الاتصال هاتفياً بخدمة الترجمة الخطية والشفهية (TIS) على الرقم 131 450. يُرجى أخذ هذا الكتاب معك عند زيارة أية خدمة صحية أو أي طبيب أو مستشفى.

### Burmese

#### အင်္ဂလိပ်ဘာသာကို ဖတ်ရှုရန် အကူအညီလိုအပ် ပါသလား။

အင်္ဂလိပ်ဘာသာကို မဖတ်ရှုနိုင်လျှင် အောက်တွင် ဖော်ပြထားသော သင်နှင့် အနီးဆုံးနေရာရှိ Health Care Interpreter Service (ကျန်းမာရေး စောင့်ရှောက်မှု စကားပြန် ဝန်ဆောင်မှု) ဌာနရှိ တစ်စုံတစ်ယောက်ကို ပြောပါ။ ဘာသာပြန်နှင့် စကားပြန် ဝန်ဆောင်မှု (TIS) 131 450 သို့လည်း ဖုန်းဖြင့် ဆက်သွယ်နိုင်ပါသည်။ ကျေးဇူးပြု၍ ကျန်းမာရေး ဝန်ဆောင်မှုတစ်ခုခု ရလှ သည့်အခါ ဆရာဝန် သို့မဟုတ် ဆေးရုံသို့လာသည့် အခါ ဤစာအုပ်ကို သင်နှင့်အတူ ယူဆောင်လာပါ။

### Chinese Simplified

#### 阅读英文需要帮助吗？

如果你看不懂英文，请按下文资料联络就近的Health Care Interpreter Service (医疗卫生翻译服务处)。也可以致电 131 450 联系口笔译服务署 (TIS)。请在前往卫生服务机构、医院或去看医生时带上这本书。

### Chinese Traditional

#### 閱讀英文需要幫助嗎？

如果你看不懂英文，請按下文資料聯絡就近的Health Care Interpreter Service (醫療衛生翻譯服務處)。也可以致電131 450聯繫口筆譯服務署 (TIS)。請在前往衛生服務機構、醫院或去看醫生時帶上這本書。

### Dari

#### آيا برای خواندن متن انگلیسی به کمک ضرورت دارید؟

اگر خواندن انگلیسی را نمی دانید، لطفاً با یکی از کارکنان Health Care Interpreter Service (خدمات ترجمان شفاهی مواظبت های صحی) در نزدیک ترین محل فهرست شده در ذیل صحبت کنید. همچنین می توانید با خدمات ترجمه تحریری و شفاهی (TIS) شماره 131 450 تلفون کنید. لطفاً این کتاب را هنگام مراجعه به هر مرکز صحی، دکتر یا شفاخانه همراه داشته باشید.

### Dinka

#### Wíc kuɔɔny nē kuēn Thoŋ de Liŋliith?

Na ciē ye kuen nē Thoŋ de Liŋliith ke yīn jam wek ke raan tō tē de Health Care Interpreter Service (Ajuieer Wēēr Thok de Kuɔɔny nē Kā ke Pial e Guöp) tē thiäk ke yīn ke cī nyuɔoth piiny. Yīn lēu ba telepuun yup eya tē enoŋ Ajuieer de Wēēr Wēl cī Gät Piny ku Wēēr de Thok tō nē 131 450. Yīn lēu ba ye bunē muk ke yīn tē le yīn tē tōŋ de ajuir ke kē ke pial e guöp, akīm ka paan akīm.

## Farsi

### آیا برای خواندن متن انگلیسی به کمک نیاز دارید؟

اگر خواندن انگلیسی را نمی دانید، لطفا با یکی از کارکنان Health Care Interpreter Service (خدمات مترجم گفتاری مراقبت های بهداشتی) در نزدیک ترین محل فهرست شده در زیر صحبت کنید. همچنین می توانید به خدمات ترجمه نوشتاری و گفتاری (TIS) شماره 131 450 تلفن کنید. لطفا این کتاب را هنگام مراجعه به هر مرکز بهداشتی، پزشک یا بیمارستان همراه داشته باشید.

## Hindi

### क्या आपको अंग्रेज़ी पढ़ने में मदद चाहिए?

यदि आप अंग्रेज़ी नहीं पढ़ सकते हैं तो कृपया नीचे दिए गए Health Care Interpreter Service (स्वास्थ्य देखभाल दुभाषिया सेवा) में आपके निकट की सेवा में किसी से बात करें। आप अनुवाद व दुभाषिया सेवा (TIS) को 131 450 पर फ़ोन कर सकते हैं। जब भी आप किसी स्वास्थ्य सेवा, डॉक्टर के पास या अस्पताल जाएँ तो कृपया इस पुस्तक को लेकर जाएँ।

## Indonesian

### Apakah Anda butuh bantuan membaca teks berbahasa Inggris?

Jika Anda tidak dapat membaca teks dalam bahasa Inggris silahkan menghubungi Health Care Interpreter Service (Layanan Juru Bahasa Perawatan Kesehatan) di lokasi terdekat dari Anda di daftar di bawah ini. Anda juga dapat menelepon Layanan Penerjemahan dan Juru Bahasa (TIS) di 131 450. Harap membawa buku ini sewaktu Anda mengunjungi layanan kesehatan, dokter atau rumah sakit.

## Khmer

### តើអ្នកត្រូវការជំនួយក្នុងការអានជាភាសាអង់គ្លេសឬទេ ?

ប្រសិនបើអ្នកពុំអាចអានជាភាសាអង់គ្លេសបានទេ សូមនិយាយទៅកាន់អ្នកណាម្នាក់ នៅ Health Care Interpreter Service (សេវាអ្នកបកប្រែភាសាថែទាំសុខភាព) នៅទីតាំងជិតអ្នកបំផុតដែលចុះបញ្ជីខាងក្រោមនេះ។ អ្នកក៏អាចទូរស័ព្ទសេវាបកប្រែភាសាសរសេរ និងនិយាយ (TIS) ផងដែរលេខ 131 450។ សូមយកសៀវភៅនេះទៅជាមួយអ្នកនៅពេលអ្នកអញ្ជើញទៅសេវាសុខភាព វេជ្ជបណ្ឌិត ឬមន្ទីរពេទ្យណាមួយ។

## Korean

### 영어로 읽는데 도움이 필요하세요?

영어로 된 내용을 이해할 수 없으신 분은 아래 표기된 가까운 Health Care Interpreter Service (헬스 케어 통역 서비스)에 지원을 요청하십시오. 또한 통번역 서비스 (TIS)에 131 450으로 전화하셔도 됩니다. 보건 서비스나 의사 혹은 병원을 찾으실 때 본 책자를 지참하십시오.

## Lao

### ທ່ານຕ້ອງການຄວາມຊ່ວຍເຫຼືອໃນການອ່ານ ພາສາອັງກິດບໍ?

ຖ້າທ່ານອ່ານພາສາອັງກິດບໍ່ໄດ້ ກະລຸນາເວົ້າ ກັບໃຜຜູ້ນຶ່ງທີ່ Health Care Interpreter Service (ບໍລິການນາຍພາສາການດູແລສຸຂ ພາບ) ທີ່ຢູ່ໃກ້ທ່ານທີ່ສຸດຊຶ່ງຢູ່ໃນບັນຊີຂ້າງ ລຸ່ມນີ້. ທ່ານຍັງສາມາດໂທອະສັບຫາບໍລິ ການ ການແປເອກະສານແລະນາຍພາສາ (TIS) ຕາມໝາຍເລກ 131 450. ກະລຸນານຳເອົາປຶ້ມນີ້ໄປນຳໃນເວລາທີ່ທ່ານໄປຫາບໍລິການດ້ານສຸຂພາບ, ຫານາຍໝໍຫຼືໄປໂຮງໝໍ.



## Nepali

**तपाईंलाई अंग्रेजी पढ्न मद्दत चाहिन्छ?**

यदि तपाईं अंग्रेजी पढ्न सक्नु हुन्न भने कृपया तपाईंले कसै संग Health Care Interpreter Service (स्वास्थ्य हेरचाह अनुवादक सेवा) मा कसैसंग कुरा गर्नुहोस्, तपाईंको नजिकको स्थान तल दिईएको छ। तपाईंले अनुवाद र व्याख्या सेवा (TIS) मा 131 450 मा पनि फोन गर्न सक्नुहुनेछ। कृपया तपाईंले कुनैपनि स्वास्थ्य सेवा, डाक्टर वा अस्पतालमा जानु हुँदा यो पुस्तिका लैजानुहोला।

## Somali

**Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo akhrinta Ingiriiska?**

Haddii aadan akhrin Ingiriis fadlan kala hadal qof Health Care Interpreter Service (Adeegga Turjubaanka Daryeelka Caafimaadka) goobta kuugu dhow ee hoos ku qoran. Waxaad sidoo kale taleefan u soo diri kartaa Adeegga Turjubaanka Afka iyo Qoraalka (TIS) ee ah 131 450. Fadlan u qaado buuggan markaad tegayso adeega caafimaadka, dhakhtar ama isbitaalkii kasta.

## Tamil

**ஆங்கிலம் வாசிப்பதில் உங்களுக்கு உதவி தேவையா?**

நீங்கள் ஆங்கிலம் வாசிக்காதவர் என்றால், கீழேயுள்ள அட்டவணையில் உங்களுக்கு அண்மையிலுள்ள Health Care Interpreter Service ('சுகாதார கவனிப்பு மொழிபெயர்த்துரைப்பாளர் சேவை')-இலுள்ள யாராவதொருவருடன் தயவு செய்து பேசுங்கள். 13 14 50 -இல் 'மொழிபெயர்ப்பு மற்றும் மொழிபெயர்த்துரைப்பு சேவை (TIS)'யையும் நீங்கள் தொலைபேசியில் அழைக்கலாம். சுகாதார சேவை, மருத்துவர் அல்லது மருத்துவமனை எதற்கும் செல்லும்போது தயவு செய்து இந்தப் புத்தகத்தினை உடன் எடுத்துச் செல்லுங்கள்.

## Thai

**คุณต้องการความช่วยเหลือในการอ่านภาษาอังกฤษไหม?**

ถ้าคุณอ่านภาษาอังกฤษไม่ออก โปรดพูดกับเจ้าหน้าที่ที่ Health Care Interpreter Service (บริการล่ามการดูแลสุขภาพ) ที่อยู่ใกล้คุณที่สุดตามรายการข้างใต้ นี้ นอกจากนี้ คุณยังสามารถใช้บริการแปลและล่าม (TIS) ได้ด้วยโดยโทรไปที่หมายเลข 131 450 โปรดนำสมุดนี้มาด้วยเมื่อคุณมารับบริการสุขภาพ มาพบแพทย์ หรือมาโรงพยาบาลไม่ว่าที่ใด

## Turkish

**İngilizce okumak için yardıma ihtiyacınız var mı?**

İngilizce okuyamıyorsanız, aşağıda sıralanan yerlerden size en yakın Health Care Interpreter Service'inde (Sağlık Bakımı Tercümanlık Servisi) birisiyle konuşun. Ayrıca Yazılı ve Sözlü Çeviri Servisi'ne de (TIS) 131 450'den telefon edebilirsiniz. Herhangi bir sağlık servisine, doktora veya hastaneye giderken bu kitabı lütfen yanınızda götürün.

## Vietnamese

**Quý vị có cần giúp đỡ để đọc tiếng Anh?**

Nếu quý vị không đọc được tiếng Anh, vui lòng gọi đến Health Care Interpreter Service (Dịch vụ Thông dịch Y tế) ở địa điểm gần quý vị nhất trong danh sách dưới đây. Quý vị cũng có thể gọi đến Dịch vụ Thông Phiên dịch (TIS) qua số 131 450. Vui lòng đem quyển này theo khi quý vị đến gặp dịch vụ y tế, bác sĩ hoặc bệnh viện.

## Xiriirada adeegga turjubaanka ee daryeelka caafimaadka

### **Sydney South Western North iyo Central Network of South East Sydney**

Taleefan: 02 9828 6088

### **Illawarra – Shoalhaven**

Taleefan: 02 4274 4211

### **Murrumbidgee iyo Southern NSW**

Taleefan: 1800 247 272

### **Sydney West iyo Northern Sydney**

Taleefan: 02 9912 3800

### **Hunter iyo New England**

Taleefan: 02 4924 6285

### **Central Coast Northern NSW iyo Mid North Coast Greater Western NSW**

Taleefan: 1800 674 994 (Dibada Hunter iyo New England)

## Ku tallaal ilmahaaga wakhtiga

Sida ugu wanaagsan ee ilmahaaga looga ilaalin karo cuddurada khatarta ah ee tallaalka lagaga hortegi karo waa in lagu tallaalaa wakhtiga, sida waafaqsan Qorshaha Tallaalka NSW ee lagu talliyey.

Australian Immunisation Register (Diiwaanka Tallaalka Australiya) ayaa la soconaya ilmahaaga taariikhdiisa tallaalka. Dhammaan dadka ka diiwaangashan Medicare si toos ah ayaa loogu daraa Australian Immunisation Register.

**Ogow:** Australian Childhood Immunisation Register (ACIR) hadda waa Australian Immunisation Register (AIR) iyo cid kasta oo ka diiwaangashan Medicare waxay ku jiraan AIR.

# Macluumaadka loogu talaglay waalidiinta



## Macluumaadka loogu talaglay waalidiinta

Nidaamka NSW Health (Caafimaadka NSW) iyo shaqaalaha caafimaadka waxay ka ciyaaraan door muhiim ah xagga ka caawinta qoysaska iyo carruurta inay gaaraan fiyoobaan iyo caafimaad. Wixii ah macluumaad faahfaahsan tixraac [www.health.nsw.gov.au](http://www.health.nsw.gov.au).

## Child and Family Health Centres (Xarumaha Caafimaadka Qoyska iyo Ilmaha)

Child and Family Health Centres Waxay siiyaan adeeg bilaash ah dhammaan waalidiinta cusub ee NSW. Waxaa shaqaale ka ah kalkaaliyayaasha caafimaadka qoyska iyo ilmaha o bixiya jeegareynta fiyoobida, koritaanka iyo caafimaadka ilmahaaga iyo sidoo kale taageero, waxbarasho iyo macluumaad ku saabsan dhammaan dhinacyada waalidnimada. Si aad u hesho Xarunta Caafimaadka Qoyska iyo Ilmaha ee kuugu dhow: <http://www.health.nsw.gov.au/kidsfamilies/MCFHealth/Documents/2015-nsw-child-and-family-health-nursing-services.pdf>

## Aqoonyahanada muhiimka ah ee caafimaadka ilmaha

**Dhakhtarkaaga guud (GP)** ama **dhakhtarka qoyska** waa qofkaad arkeyso haddii ilmahaagu jiran yahay, ama haddii ay jiraan waxaad saluugsan tahay oo ku saabsan fiyoobida ilmahaaga. GP wuxuu bixiyaa daryeelka caafimaadka ee koowaad, u gudbinta dhakhaatiirta takhasuska leh iyo meeshii lagama maarmaan ah, wuxuu xiriiriyaa daryeelka caafimaadka ilmahaaga.

**Dhakhtarka carruurta** wuxuu siin karaa daryeel caafimaad oo takhasus leh ilmahaaga. Waxaad uga baahan tahay soo gudbin GP si aad ballan uga sameysato dhakhtarka carruurta.

## Jeegareynta joogtada ah ee koritaanka iyo caafimaadka ilmahaaga

Waa inaad u geysaa ilmahaaga kalkaalisada caafimaadka qoyska iyo ilmaha ee Family Health Centre ilmaha ee xaafadaada, ama u tag dhakhtarkaaga, wixii jeegareyn caafimaad ah mid kasta oo ka mid ah da'ahan soo socda. Dhammaan jeegareynadaan caafimaad waa muhiim maadaama ay caawinayaan dhakhtarkaaga ama kalkaalisadu inay la socdaan koritaanka iyo caafimaadka ilmahaaga iyo inay gartaan wixii dhibaato ah ee soo socda. Ugee ilmahaaga jeegareyn kasta oo caafimaad xitaa haddii aysan jirin waxaad saluugsan tahay oo ku saabsan koritaankooda ama caafimaadkooda.

### Carruurta waa inuu baadhaa aqoonyahanka caafimaadku:

- dhalashada
- 1 ilaa 4 toddobaad
- 6 ilaa 8 toddobaad
- 6 bilood
- 12 bilood
- 18 bilood
- 2 sanno
- 3 sanno
- 4 sanno

**Haddii aad saluugsan tahay caafimaadka, koboca, koritaanka ama dabeecada ilmahaaga inta u dhaxeysa jeegareynadaan caafimaad ee qorsheysan, fadlan ugee ilmahaaga kalkaalisada caafimaadka qoyska iyo ilmaha ama dhakhtarkaaga.**

## La socoshada koritaanka iyo koboca ilmahaaga

Dhammaan carruurta waa ku kobcaan oo koraan heerar kala duwan. Waxaa muhiim ah in lala socdo ilmahaaga koritaankiisa si wixii aad saluugsan tahay ee suurtagal ah loo aqoonsado oo loo daaweeyo sida ugu horeysa ee suurtagalka ah.

### Ilmahaaga kobiciisa iyo koritaankiisa waa la socda:

- Adoo jeegareynaya ilmahaaga calaamadihiisa oo ka jawaabaya su'aalaha koritaanka (*Learn the Signs. Act Early.*) (*Barro Calaamadaha. Oo Hore wax u Samee/Act Early*) ee buuggan dhexdiisa.
- iyadoo aqoon yahanku uu baaritaan ku sameynayo ilmahaaga wakhtiyada jeegareynta caafimaadka qorsheysan ee joogtada ah
- baaritaanada iskiriingareynta

**Ogow:** Baaritaanada iskiriingareynta, jeegareynta iyo baaritaanada weligood ma noqon karaan 100% sax. Marmarka qaarkood jeegareynta caafimaadku ama baaritaanka iskiriingareynta waxaa laga yaabaa inay soo jeediyaan inay dhibaato jirto iyadoon waxba jirin, ama la gafo dhib jira. Badanaa dhib cusub ayaa laga yaabaa inuu dhaco ka dib marka ilmahaaga baaritaanka iskiriingareynta ah lagu sameeyo ama jeegareynta caafimaadka. Taasi waa sababta ay muhiimka u tahay in la tago jeegareynta caafimaadka lagu taliyey oo dhan iyo in la buuxiyo su'aalaha waalidiinta loogu talagalay buuggan dhexdiisa.

## **Barro Calaamadaha. Hore u Samee**

Jeegareyn kasta oo caafimaad laga bilaabo 2 bilood waxaad arki doontaa su'aalo taxana ah oo ku hoos qoran cinwaanka *Learn the Signs. Act Early*. Su'aalahan waxaa lagu siiyey si ay kaaga caawiyaan inaad aragtid meesha ilmahaaga koritaankiisu marayo, iyo markay tahay feker fiican inaad aqoon yahanka weydiisato caawimaad.

Su'aalahan ka jawaab sida ugu saxsan ee aad uga jawaabi karto, sababtoo ah waxay kaa caawin karaan adiga iyo dhaktarkaaga ama kalkaalisada caafimaadka qoyska iyo ilmaha inay ku gartaan wixii saluug ah ee ku saabsan sida ilmahaagu wax u baranayo, koritaanka iyo isduu u dhaqmayo.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan calaamadaha iyo ilaha macluumaadka ee dheeraadka ah ee waalidiinta, oo ay ku jiraan fiidyowada, gal website ka NSW Health ee [www.health.nsw.gov.au/mybluebook](http://www.health.nsw.gov.au/mybluebook)

Ama gal Resourcing Parents [www.resourcingparents.nsw.gov.au](http://www.resourcingparents.nsw.gov.au)

Wixii fikrada dheeraad ah ee sidii aad ku dhiirigelin ilmahaaga koritaankaaga la soo baxa hadalka jeceylka aalada ciyaarta akhriska iyo heesta, gal <http://itsrp.resourcingparents.nsw.gov.au/home/resources>

Adiga, aqoon yahan kasta ee ilmahaagu uu arko, waa inuu ku qoraa ilmahaaga caafimaadkiisa iyo horumarkiisa buuggan dhexdiisa. Waxaa jira qaybta 'qoraalka horumarka' halkaas oo aad ku ilaalin karto qoraalada faahfaahsan.

## Ammaanka ilmaha

Shilalka iyo dhaawacyada carruurnimo oo badan waa laga hortegi karaa. Tallooyinka ammaanka, macluumaadka iyo ilaha macluumaadka ee ammaanka ilmaha oo badan, gal [www.kidsafensw.org](http://www.kidsafensw.org) iyo [www.health.nsw.gov.au/childsafety](http://www.health.nsw.gov.au/childsafety)

## Ammaan u seexashada

Lix siyaalood oo si ammaan ah loogu seexiyo ilmaha oo lagu yareeyo khatarta dhimashada degdega ee aan la fileynin markuu dhasho:

- Ilmaha u seexi dhabarka.
- Madaxa iyo wejiga yaan la daboolin.
- Ilmuhu waa inuu joogaa meel sigaarka ka xor ah dhalashada ka hor iyo ka dibba.
- Degaanka seexashada ammaanka habeen iyo maalin.
- Ku seexi ilmaha saruur taal qolka waalidiinta.
- Ilmaha naas nuuji.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ammaan u seexinta iyo ka hortaga dhimashada aan la fileyn ee degdega ah ee ilmaha yar, gal [www.rednose.com.au](http://www.rednose.com.au)

Muuqaalka ammaan u seexinta iyo qoraalka oo dib loogu soo saaray ogolaanshaha Red Nose (oo hore u ahaa SIDS and Kids).



**red  
nose**  
saving little lives

## Berkeda biyaha iyo ammaanka carruurta

Biyo ku qarqashada waa lambarka koowaad ee sababa dhimashada carruurta. Sababtoo ah waxay u dhici kartaa si degan oo degdeg ah, waa muhiim inaan si firfircoon u kormeerto ilmahaaga markay ku jiraan ama u dhow yihiin biyaha wakhti kasta. Tan micnaheedu waxaa weeye qof weyn oo karti dabaaleed leh inuu gacan dhererkeed uu u jiro ilmo kasta.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee biyaha ku saabsan iyo ammaanka berkada ee loogu talagalay carruurta, gal Kidsafe ee <http://www.kidsafensw.org/water-safety/>

Ama waxaad booqan kartaa Netwaaga Carruur Korinta ee [http://raisingchildren.net.au/articles/swimming\\_pool\\_fences.html](http://raisingchildren.net.au/articles/swimming_pool_fences.html)

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ammaanka berkada iyo sidii loo hubin lahaa in berkadaadu ay ammaan tahay gal [www.swimmingpoolregister.nsw.gov.au](http://www.swimmingpoolregister.nsw.gov.au)

## Ammaanka gaariga

Ammaanka gaarigu waa u muhiim carruurta da'a kasta ah. Waa sharci dhammaan carruurta ilaa toddoba sanno jirka ah in si sax ah loo xiro iyadoo loo eegayo da'dooda iyo xajmigooda. Carruurta waaweyn, dadka dhalinyarada ah iyo dadka waaweyn waa inay isticmaalaan suunka kursiga ee dadka waaweyn. Wixii macluumaad dheeraad ah gal [www.roadsafety.transport.nsw.gov.au/stayingsafe/children/childcarseats](http://www.roadsafety.transport.nsw.gov.au/stayingsafe/children/childcarseats)



Waxyaalo yar oo laga saluugsan yahay ammaanka oo muhiim ah in laga warqabo waa:

### **Ilaaha yar yar**

- Iska rog rogida miiska bedelaada, miiska ama sariirta.
- Ku mergashada shay yar
- Gubashada ay sababtay cabitaan kulul oo lagu daadiyey ilmaha.
- Cunida sun ama wax badan ka qaadashada daawada.
- Ka dhicida gacmaha xannaaneeyaha.

### **Raad dhaqaajiska 12 bilood ilaa 3 sanno**

- Ku mergashada cuntooyin aan habooneyn iyo walxaha yar yar.
- Ka soo dhicida kursiga dheer, tarooliga dukaameysiga ama baraamka ama jaranjaro ka dhicida.
- Gubashada ay sababtay ilmaha oo furaya tuunbada biyaha kulul ee qubeyska ama ka soo jiidida maqlaha cunto kariyaha.
- Cunida suntan, daawooyinka iyo walxaha nadaafada ee guriga oo aysan hore u gaari jirin.
- Gubashooyinka ay sababeen dababka iyo kululeeyayaashu.
- Ku dhicitaanka baabuur joogta meelaha guryaha laga soo galo.
- Ku qarqashada qubeyska, berkadaha meelaha biyaha kulul ee dabaasha ee aan deyrka lahayn.
- Ka soo boodida alaabta guriga iyo ku ordida alaabta afka leh.
- Ka soo dhicida qalabka garoonka ciyaarta.
- Ku cararida wadada isagoon eegin.
- Ka soo dhicida daaqadaha iyo balakoonka.

### **Carruurta jira 3 ilaa 5 sanno**

- Ka soo dhicida baaskiilka iskuutarka, qalabka garoonka ciyaarta ama guriga.
- Qanniayada eyga.
- Dhaawacyada biyaha kulul.
- Ka soo dhicida daaqadaha iyo balakoonada.
- Ku dhicitaanka baabuurta joogta meesha guriga laga soo galo.
- Ku qarqashada qubeyska, baraagaha dabaasha iyo kuwa biyaha kulul ee aan deyrka lahayn.

## Tallaalida ilmahaaga

Sida ugu wanaagsan ee aad uga ilaalin karto cudurada khatarta ah ee lagaga hortegi karo tallaalka waa in tallaalka la siiyo wakhtigii loogu talagalay, sida waafaqsan Qorshaha Tallaalka NSW ee lagu talinayo.

Waxaad heli doonto Qoraalka Taariikhda Tallaalka AIR boost aka dib marka ilmahaagu uu dhammeysto tallaalkooda 4 sanno jirka.

Waa inaad keentaa cadeynta xaalada tallaalka ilmahaaga si looga diiwaangeliyo dugsiga iyo xannaanada carruurta.

Waxaad ka heli kartaa Qoraalka Taariikhda Tallaalka ilmahaaga AIR wakhti kasta:

- interneetka [www.humanservices.gov.au/online](http://www.humanservices.gov.au/online)
- qof ahaan Medicare Service Centre ee xaafadaada
- Taleefanka ah 1800 653 809.

## Ku keydi Taariikhda Tallaalka aalada taleefanka

Ku keydi Taariikhda Tallaalka aalada loogu talagalay waalidiinta si loo abuuro qorshaha tallaalka ilmo kasta, soo koobitaanka isticmaalka tallaalka carruurta u baahan tahay iyo da'aha la tallaalayo. Waxay si toos ah kuugu soo direyaan xusuusiyayaal si aad ugu sameyso ballamaha dhakhtarka ee tallaalada ilmahaaga.

Si aad ula soo baxdo aalada, booqo [www.immunisation.health.nsw.gov.au](http://www.immunisation.health.nsw.gov.au)



# Website –do iyo xiriiro muhiim ah



## Xiriir muhiim ah

Lambarada taleefanka ee xaalada degdegta ah waxay ku taxan yihiin xagga dambe ee galka buuggan.

Magac	Cinwaan	Tel/limeyl
Dakhtarka qoyska		
Xarunta Caafimaadka Qoyska iyo Ilmaha		
Dhakhtarka ilkaha		
Dakhtar takhasus ah		
Xarunta xannaanada carruurta/xannaano maalmeedka qoyska		
Kindhada/Dugsiga ka hor		
Xarunta caafimaadka bulshada		
Dugsiga hoose dhexe		
Dugsiga sare		
Golaha degaanka/dawladda hoose		

## Ilaaha macluumaadka iyo website ka

### **NSW Ministry of Health (Wasaaradda Caafimaadka NSW)**

**[www.health.nsw.gov.au](http://www.health.nsw.gov.au)**

Website ka NSW Kids and Families (Qoysaska iyo Ilmaha NSW) waxay bixiyaan helitaanka macluumaadka iyo ilaha macluumaadka ee fara badan.

### **Raising Children Network (Netwaaga Korinta Carruurta)**

**[www.raisingchildren.net.au](http://www.raisingchildren.net.au)**

Website ka Raising Children wuxuu bixiyaa macluumaad ku saleysan cilmi baaris, wakhtiga la socota in ka badan 800 oo mowduuc oo la xiriira korinta carruur caafimaad qabta, laga bilaabo kuwa hadda dhashay ilaa iyo dhalinyaranimada hore.

### **Children's Hospitals (Isbitaalka Carruurta)**

Isbitaaladani waxay leeyihiin warqadaha xaqiiqda internetka oo kala duwan kuna saabsan arimaha caafimaadka carruurta:

*The Sydney Children's Hospital Network – Randwick Campus*

**[www.sch.edu.au/health/factsheets](http://www.sch.edu.au/health/factsheets)**

*The Sydney Children's Hospital Network – Westmead Campus*

**[www.chw.edu.au/parents/factsheets](http://www.chw.edu.au/parents/factsheets)**

*John Hunter Children's Hospital*

**<http://www.hnekidshealth.nsw.gov.au>**

### **Jamciyadda Fiyooabaanta Carruurta ee Daryeelka caafimaadka (AWCH)**

**[www.awch.org.au](http://www.awch.org.au)**

Khadka waalidka (oo bilaash ah)

**1800 244 396**

oo la helayo Tallaadada – Khamiista, 9.30 am – 2 duhurkii

AWCH waa ururka ugu sareeya ee u dooda baahida carruurta, dadka dhalinyarada ah iyo qoysaska ku jira nidaamka daryeelka caafimaadka ee Australia.

### **Healthdirect Australia**

**[www.healthdirect.gov.au](http://www.healthdirect.gov.au)**

**1800 022 222**

Healthdirect Australia waa adeegga macluumaadka iyo talaalada caafimaadka taleefanka ee 24 ka saac oo bilaash ah.

## Naas nuujinta ilmahaaga

### Australian Breastfeeding Association (Jamciyada Naas nuujinta Australia)

[www.breastfeeding.asn.au](http://www.breastfeeding.asn.au)

Macluumaadka iyo taageerada Naas nuujinta waxaa laga helayaa folanteerka oo laga helo Khadka taleefanka Naas nuujinta 1800 686 268. Hooyooyinku waxay isugi tegi karaan kooxaha degaanka si saaxiibtinimo, wadaagida khibrada waalidnimada iyo taageerada naas nuujinta ee ka foolka ah. Macluumaadka khabarada naas nuujinta iyo xiriirada ee adeegyada dhammaan ABA waxaa laga heli karaa cinwaanka website kore.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan naas nuujinta ilmahaaga gal

<http://www.health.nsw.gov.au/kidsfamilies/MCFhealth/Publications/breastfeeding-your-baby.pdf> ama aad Raising Children Network

[http://raisingchildren.net.au/breastfeeding/http://raisingchildren.net.au/breastfeeding/babies\\_breastfeeding.html](http://raisingchildren.net.au/breastfeeding/http://raisingchildren.net.au/breastfeeding/babies_breastfeeding.html)

### Resourcing Parents (Macluumaad siinta Waalidiinta)

<http://www.resourcingparents.nsw.gov.au/Resources/EarlyLearning>

Resourcing Parents waxay soo saareen macluumaadyo kala duwan oo loogu talagalay waalidiinta si ay u siiyaan tallo iyo macluumaad ku saabsan bulshada shucuurta maskaxeed iyo garaad ee ilmaha:

- Buuggaag yar yar oo ay sahlan tahay akhrintoodu oo taxane midabo badan leh ayaa ka caawiya qoysaska Aborujinka, xaanneeyayaasha iyo waalidiinta macluumaadka qoyska iyo tallooyinka waalidnimo si ay uga caawiyaan kobcinta carruur caafimaad qabta oo xooggan.
- *Jaceyka, Hadal, Hees, Akhri, Ciyaar* kaararka rogrogitaanka kortitaanka ilmuhu waxay ka kooban yihiin fikradaha si ay u taageeraan koritaanka hore ee ilmahaaga. Waxaa lagu turjumay afar luuqadood ee jaaliyadaha ugu waaweyn.

### Kidsafe (NSW) (Ammaanka Ilmaha)

[www.kidsafensw.org](http://www.kidsafensw.org)

Kidsafe NSW waxaa ka go'an in la yareeyo tirada iyo ba'naanta dhaawacyada ilmaha ee aan ula kaca ahayn ee kor u qaadida ammaanka ilmaha. Website koodu wuxuu lahaa macluumaad ku saabsan macluumaadka hadda iyo dhacdooyinka, warqadaha xaqiiqda, ilaha macluumaadka iyo macluumaadka barnaamijka oo ka caawinaya carruurta inay ammaan helaan.

## Australian Immunisation Register (Diiwaanka Tallaalka Australia)

Australian Immunisation Register (AIR) ayaa daba geli doona taariikhda tallaalka ilmahaaga. Dhammaan carruurta ka diiwaangashan Medicare ka ayaa si toos ah loogu daray AIR.

### Website ka myGov

Haddii ilmahaagu uusan ka diiwaangashaneyn Medicare waxaad abuuri kartaa xisaabta interneetka ee Medicare oo ah website ka myGov ee [www.my.gov.au](http://www.my.gov.au)

Website ka myGov wuxuu bixiyaa goob kaliya oo isku xirta adeegyada Dawlada Australia, oo ay ku jiraan Medicare, Centrelink, Xafiiska Cashuuraha Australia, Diiwanka eHealth ee Shakhsigu Kontoroollo, Taageerada Ilmaha, JobSearch Australia iyo Qorshaha Ceymiska Iinta Qaranka.

## Healthy Kids (Caafimaadka Ilmaha)

[www.healthykids.nsw.gov.au](http://www.healthykids.nsw.gov.au)

Website-ku waa 'dukaan wax walba haye ah' oo macluumaadka loogu talagalay xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta kuna saabsan nashaadka jireed iyo cunto caafimaad leh iyo xarakaad jireed. Macluumaad wax ku oola oo waalidka ayaa laga helaa websytko waxaana ka mid ah:

- *Starting Family Foods – Introducing your baby to solid foods (Bilaabida Cuntooyinka Qoyska – Warqada barida ilmahaaga cuntooyinka adag)*
- *Caring for Children – Birth to 5 years (Food, Nutrition and Learning Experiences). Xannaaneynta Carruurta – Dhalasho ilaa 5 sanno (Cunto, Nafaqo iyo Waayo aragnimada Waxbarasho).*

## Ku keydi Taariikhda Tallaalka aalada taleefanka

Waa maxay sababtaad ula soo baxayso aalada dhow ee app-ka 'Ku keydi Taariikhda talaalka':

- Waa bilaash sahlan in la isticmaalo.
- Si loo sameeyo qorshe shakhsiyeed ee ilmo kasta.
- Wuxuu kuu soo dirayaa xusuusin si aad balamo u sameysato.
- Waxay kugu siineysaa macluumaadka tallaalka farahaaga caaradooda.
- Waxay bixisaa heeso/coddad ku dejinaya.

Si aad ula soo baxdo aalada app-ka, gal [www.immunisation.health.nsw.gov.au](http://www.immunisation.health.nsw.gov.au)



# Taariikhda qoyska iyo macluumaadkeyga





## Dhammaan wax igu saabsan

Magaceyga

Cinwaanka guriga

Isbedelka cinwaanka

Jinsiga | / dh

Taariikhda dhalashada / /

Culeyska dhalashada (kg)

## Waalidkay

Magac

Tel (sh)

(g)

limeyl

Magac

Tel (sh)

(g)

limeyl

Luuqadeyda/heyga ee lagaga hadlo guriga

Aborujiiinka haa / maya

Torres Strait Islander haa / maya

Xannaaneeyayaasha kale

Wallaaladay (magacyada/da'aha)

## Taariikhda caafimaadka qoyska iyo qodobada khatarta

	Haa	Maya
Wax ka mid ah qaraabada dhow ee ilmahaaga oo dhega la'aa ma jiray ama lahaa dhibaataada maqalka carruurnimadiisii?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Cid ka mid ah qoyska oo wax dhibaato ah ay qabsatay ma jirtaa carruurnimadii?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ma yiraa mid ka mid ah qaraabada dhow ee ilmahaaga oo hal il la'a ama labadaba?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Intii aad uur lahayd, ilmahaaga hooyadii miyey ku dhacday jadeeco, cytomegalovirus, toxoplasmosis, herpes ama wax xannuun kale ah oo leh finnan ama xumad?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Wakhtiga dhalashada, ilmahaaga miisaankiisu miyuu ka yaraa 1500 garaam, miyuu u baahday inuu joogo unnuga daryeelka degdega ah wax ka badan laba maalmood, ama ma u baahda ogsijiin 48 saacadood ama ka badan?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ilmahaagu miyuu ku dhashay wax dhibaato jireed ah?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Miyey jirtaa wax taariikh qoyseed ah ee koritaanka aan caadi ahayn ee misigaha ama dhalmada dabadu soo horeyso?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

**Haddii aad ku jawaabtay HAA wax ka mid ah su'aalaha kore, fadlan u sheeg dhakhtarkaaga ama kalkaalisada caafimaadka qoyska iyo ilmaha.**

# Diiwaanada



## Qoraalka horumarka

Adiga iyo aqoon yahanadaada caafimaadku waxaad ku sameysan kartaan qoraal qaybtaan marka ilmahaaga la arko sababtay doonta ha ahaatee oo aan ahayn jeegareynta caafimaadka ee da'da khaaska ku ah.

Taariikh	Da'da	Sababta /Falka

# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed

Taariikh	Da'da	Sababta /Falka

# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed

Taariikh	Da'da	Sababta /Falka

# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed

Taariikh	Da'da	Sababta /Falka

# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed

Taariikh	Da'da	Sababta /Falka



# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed

Taariikh	Da'da	Sababta /Falka

# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed

Taariikh	Da'da	Sababta /Falka

# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed

Taariikh	Da'da	Sababta /Falka

# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed

Taariikh	Da'da	Sababta /Falka

# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed

Taariikh	Da'da	Sababta /Falka

# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed

Taariikh	Da'da	Sababta /Falka

# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed

Taariikh	Da'da	Sababta /Falka

## Diiwaanka dhaawacyada iyo jirooyinka

Adiga iyo aqoon yahanka caafimaadkaagu waa inaad qortaan wixii jiro weyn ah, dhaawac, qaliin, xasaasiyad, cudurada infekshinka leh ama dhibaato caafimaad oo daran oo kale ee ilmahaagu soo maro. Dhammaan booqashooyinka isbitaalka, oo ay ku jiraan xaaladaha degdega ah, waa in lagu taxaa halkan.

Taariikh	Dhib	Waxaa qoraalkan geliyey



# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed

Taariikh	Dhib	Waxaa qoraalkan geliyey




# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed

Taariikh	Dhib	Waxaa qoraalkan geliyey

# Diiwaankeyga caafimaadka shakhsiyeed

Taariikh	Dhib	Waxaa qoraalkan geliyey

# Shaxaha kobcida



## La socoshada iyo cabirida ilmahaaga kobcidiisa

Cabirida ilmahaaga dhererkiisa, miisaankiisa iyo madaxa dhexroorkiisa oo kuu sheegaya sida ilmahaagu u kobcayo. Dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada waa inay ku diiwaangeliyaan cabiraada ilmahaaga jeegareynta caafimaadka ee kastaa oo ay buuxiyaan shaxaha kobcistaanka ee qaybtan.

Ilmo kastaa wuxuu ku kobcaa oo ku koraa heer ka duwan ka kale. Inkastoo hal cabiraad ahi ay muhiim tahay, si aad u qiimeyso ilmahaaga kobciisa waa muhiim inaad diiwaangeliso dhawr cabir ilaa wakhti si aad u aragtid kobucu jihaduu u socdo.

Haddii aad jeclaan lahayn macluumaad intaa ka badan oo ku saabsan shaxda kobcida siday u shaqeyso, fadlan gal [www.who.int/childgrowth/en/](http://www.who.int/childgrowth/en/) iyo [www.cdc.gov/growthcharts/](http://www.cdc.gov/growthcharts/)

Laba carruur ah oo isku mid ahi ma jiraan, laakiinse waxaa jira qaar awaamiirta aasaasiga ka mid ah oo loogu talagalay miisaanka carruurta. Tasmada culeyska jirka (BMI) waxaa loo isticmaalaa in lagu qiimeeyo inuu qofku leeyahay miisaan caafimaad qaba. MBI ee shaxaha dadka loogu talagalay ayuu ku talinayaa National Health and Medical Research Council (Golaha Cilmi baarista Daawada iyo Caafimaadka Qaranka) waa in la qiimeeyo miisaanka carruurta laga soo bilaabo da'da laba sanno. Shaxahani waxay aqoonsadaan xaqiiqda in carruurta jirkoodu uu weli kobcayo oo korayo. Waxaad ka heli kartaa interneetka xisaabiayaha BMI:

<https://www.healthykids.nsw.gov.au/parents-carers/faqs/what-is-ahealthy-weight.aspx>

Lahaanshaha miisaanka caafimaadka leh waa u muhiim jirka carruurta markay korayaan oo kobcayaan. Miisaanka caafimaadka leh waxaa badanaa lagu ilaalin karaa iyadoo la ilaalinayo ama laysu dheelitirayo inta tamar ah ee ilmahaagu ka qaato (cabitaanka iyo cuntada) iyo tamarta ay isticmaalaan (ku kobcida nashaadka jireed).


Dejinta dabeecadaha jimicsiga iyo cunto nafaqa leh cunida hore iyo nololshaada waxay kaa caawineysaa inaad ilaaliso dhibaatooyinka caafimaadka sida buurnida, macaanka nooca -2aad, qaar ka mid ah noocyada kansarka iyo dhiigkarka.

Haddii aad qabto waxyaalo aad saluugsan tahay oo ku saabsan ilmahaaga siduu wax u cunno ama miisaankooda, arag dhakhtarkaaga ama kalkaalisada caafimaadka qoyska iyo ilmaha ee xaafadaada.

Tixraac bogga 18aad ee ilaha macluumaadka leh ee interneetka iyo website-yada sidii aad u taageeri lahayd koritaanka iyo kobcida ilmahaaga.




## Miisaanka da'da ee boqolkiiba Dhalashada GABDHAHA ilaa 2 sanno



Isha: World Health Organisation Child Growth Standards [www.who.int/childgrowth/en](http://www.who.int/childgrowth/en)




## Dhererka da'da boqolkiiba Dhalashada GABDHAAH ilaa 2 sanno



Isha: World Health Organisation Child Growth Standards [www.who.int/childgrowth/en](http://www.who.int/childgrowth/en)



## Miisaanka da'da boqolkiiba GABDHAHA 2 ilaa 20 sanno




CDC Shaxda kobcida- waxaa daabacay Mareykanka 30 Maajo 2000  
 Isha: Developed by the National Center for Health Statistics in collaboration  
 with the National Center for Chronic Disease Prevention and Health Promotion (2000)






## Muuqaalka da'da boqolkiiba GABDHAHA 2 ilaa 20 sanno



CDC Shaxda kobcida- waxaa daabacay Mareykanka 30 Maajo 2000  
 Isha: Developed by the National Center for Health Statistics in collaboration  
 with the National Center for Chronic Disease Prevention and Health Promotion (2000)




## Dhexroorka madaxa ee da'da boqolkiiba Dhalashada GABDHAAHA ilaa 2 sanno



Isha: World Health Organisation Child Growth Standards [www.who.int/childgrowth/en](http://www.who.int/childgrowth/en)




## Tusaha Cufka jirka ee da'da boqolkiiba GABDHAHA 2 ilaa 20 sanno



CDC Shaxda kobcida- waxaa daabacay Mareykanka 30 Maajo 2000  
Isha: Developed by the National Center for Health Statistics in collaboration  
with the National Center for Chronic Disease Prevention and Health Promotion (2000)




## Miisaanka da'da boqolkiiba Dhalashada WILASHA ilaa 2 sanno



Isha: World Health Organisation Child Growth Standards [www.who.int/childgrowth/en](http://www.who.int/childgrowth/en)




## Dhererka da'da boqolkiiba Dhalashada WIILASHA ilaa 2 sanno



Isha: World Health Organisation Child Growth Standards [www.who.int/childgrowth/en](http://www.who.int/childgrowth/en)




## Miisaanka da'da boqolkiiba WIILASHA 2 ilaa 20 saano



CDC Shaxda kobcida- waxaa daabacay Mareykanka 30 Maajo 2000  
Isha: Developed by the National Center for Health Statistics in collaboration  
with the National Center for Chronic Disease Prevention and Health Promotion (2000)




## Muuqaalka da'da boqolkiiba WIILASHA 2 ilaa 20 sanno



CDC Shaxda kobcida- waxaa daabacay Mareykanka 30 Maajo 2000  
 Isha: Developed by the National Center for Health Statistics in collaboration  
 with the National Center for Chronic Disease Prevention and Health Promotion (2000)




## Dhexroorka madaxa da'da ee boqolkiiba Dhalashada WIILASHA ilaa 2 sanno








## Tusaha Cufka Jirka ee boqolkiiba WIILASHA 2 ilaa 20 sanno



CDC Shaxda kobcida- waxaa daabacay Mareykanka 30 Maajo 2000  
Isha: Developed by the National Center for Health Statistics in collaboration  
with the National Center for Chronic Disease Prevention and Health Promotion (2000)

# Jeegareynta ilmaha dhashay iyo faahfaahinta dhalashada



Ku dheji labeelka bukaanka halkan

## Faahfaahinta dhalashada

Qaybtan waa inuu buuxiyaa aqoon yahanka caafimaadku.

Magaca ilmaha

Magaca tas-hiilaadka ilmaha

Taariikhda dhalashada / / Jinsiga lab/dhadig Jinsiga I / dh

### Macluumaadka hooyada

Magaca hooyada

Dhibka uurka

Kooxda dhiiga Waa la siiyey ka hortagaha D h / m

Foosha caadiga /la soo dedejijey- sabab

Dhibka foosha

Nooca dhalashada  Caadi  Dabakeen  Birta lagu soo qabto  
 Dhalashada qaliinka  Vac ext  Kale

### Macluumaadka dhalmada ka hor

Qiyaasta uurka Apgar 1 daqiiqo 5 daqiiqo

Ilmaha aan caadiga ahayn ee dhalmada lagu ogaaday

Dhibaatooyinka u baahan daawada

Miisaanka dhalashada (kg) Dhererka dhalashada (cm) Dhexroorka madaxa dhalashada (cm)

 Iskiriinka Maqalka Ilmaha dhashay (SWISH) oo la dhammeystiray (tixraac SWISH ee qaybtan)

Baaritaanka Iskiriinka dhibicda dhiiga ee Ilmaha dhashay Taariikh / /  
 Kale (sheeg) Taariikh / /

Fiitamiin K ayaa la siiyey  Cirbad  Afka Doosaha 1aad / / Doosaha 2aad / /  
 Doosaha 3aad / /

 Tallaalka Hep B waa la siiyey Taariikhdii la siiyey / / Himogolobiinta Hep B waa la siiyey Taariikhdii la siiyey / /

### Macluumaadka isbitaal ka bixida

Dhibaataada niyad jabka dhalmada ka dib

Quudinta naaska /masaasada marka la baxayo

Dhib ku qaba quudinta

Taariikhda ka bixitaanka isbitaal / / Miisaanka marka la baxayo (kg) Dhexroorka madaxa (cm)

Saxiix

Cinwaanka



Ku dheji labeelka bukaanka halkan

## Baaritaanka ilmaha hadda dhashay

Qaybtan waa inuu buuxiyaa aqoon yahanka caafimaadka waalidka/diinta oo jooga ka hor intaan ilmaha isbitaalka laga saarin.

Taariikhda dhalashada / / Da'da ilmaha dhashay Jinsiga I / dh

Magaca ilmaha dhashay

Jeegaree	Caadi	Faallo
Fontanelles iyo madaxa		
Indho (la socosho guud oo ay ku jirto lab jeex cas)		
Dhego		
Dhadhan iyo afka		
Wadnaha la xiriira		
Femoral pulses B / M		
Heerka neefsiga		
Uurku jirta andumbilicus		
Dabo		
Genitalia		
Xinniinyaha oo si buuxa u soo degay B / M		
Qalfoof -musuqeed		
Misig		
Maqaar		
Laab jeex		
Hooyada ma jiraan waxay saluugsan tahay oo ku saabsan ilmaheeda?	h / m Goobaabin geli jawaabta	

Baaraha (magaca oo xarfo waaweyn ah)

Darajadiisa

Saxiix

Taariikh / /

## Su'aalo loogu talagalay waa lidiinta oo ku saabsan maqalka

Fadlan goobo geli midkood 'Haa' ama 'Maya' su'aalahan hoose si uu dabaqalka saxda ah loogu sameeyo aqoon yahankaaga caafimaadku.

- Waxaan dhammeystiray su'aalaha qodobka khatarta caafimaadka ee bogga 21aad **Maya | Haa**
- Ilmahayga wuxuu qabay markuu dhashay dhibaato neefsi oo aa u daran **Haa | Maya**
- Ilmaheygu wuxuu qabaa manajaytis **Haa | Maya**
- Ilmaheygu wuxuu qabaa cagaarshow, u baahan dhiig ku shubid bedel ah **Haa | Maya**
- Ilmaheyga wuxuu ku jiray daryeelka degdega wax ka badn 5 maalmood dhalashada ka dib **Haa | Maya**
- Waxaan ogaaday waxaan caaddi ahayn oo ku saabsan ilmaheyga qoortiisa ama madaxa, sida waji oo aan caadi u qaabeysnayn, ama taaga maqaarka **Haa | Maya**
- Ilmaheygu wuxuu qabaa xaalada koritaanka (Down Syndrome) (Trisomy 21) ama xaalad kale oo la xiriirta oo waxba maqal la'aan ah **Haa | Maya**

## Haddii aad goobaabtay wax jawaab ah oo qaybta koowaad ah, fadlan u sheeg dhakhtarkaaga ama kalkaalisada caafimaadka qoyska iyo ilmaha.

<b>Natiijo</b>	<b>Caadi</b>	<b>Dib u eegid</b>	<b>Gudbin</b>
	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

## Magalka- Iskiriingareynta ilmaha yar ee Gobolka oo dhan



**SWIS-H**  
STATEWIDE INFANT  
SCREENING - HEARING

Magac \_\_\_\_\_

Taariikhda dhalashada \_\_\_\_\_

### Caafimaadka Degmada ee Xaafada

Waxaa lagu la baaray \_\_\_\_\_

Taariikhda la baaray \_\_\_\_\_

Waxaa la baaray (Magaca Qor) \_\_\_\_\_

Saxiix \_\_\_\_\_

**Natiijo** (Fadlan goobo geli)

**MIDDIG** Gudbay / Udir

**BIDDIX** Gudbay / Udir

Toos ugu dirida Dhakhtarka dhegaha

Haa

Sababta: \_\_\_\_\_

**Ku celinta iskiriinka**

**Waa loo baahan yahay**

**Looma baahna**

Waxaa lagu la baaray \_\_\_\_\_

Taariikhda la baaray \_\_\_\_\_

Waxaa la baaray (Magaca Qor) \_\_\_\_\_

Saxiix \_\_\_\_\_

**Natiijo** (Fadlan goobo geli)

**MIDDIG** Gudbay / Udir

**BIDDIX** Gudbay / Udir

Tixraac dhakhtarka maqalka

Haa

Maya

